# Gargaarka Cuntada ee Dadka Da'da Ah

**Food Support for Seniors**

***50% dadka da'da ah ee Minnesota oo kaliya oo ayaa ka soo baxa shuruudaha oo qaata gargaarka cuntada SNAP***



***Fiiro gaar ah:*** *Gargaarka Cuntada (Food Stamps) waxaa kaloo loogu yeeraa Barnaamijka Kaalmada Cuntada ama SNAP (Barnaamijka Gargaarida Kaabida nafaqada).*

## Sidee ayaan ku ogaanayaa haddii aan ka soo bixi karo shuruudaha SNAP?

Barnaamijka SNAP waxaa u leeyahay shuruudo u gaar ah dadka da'da ah ee ka weyn 60 sano. Waxaa weli la tixgeliyaa dakhliga, kheyraadka, iyo caawinaadda qofka loo fidiyo. Laakiin xadka u go'an iyo qeybta ku soo beeganta waa ka duwan tahay dadka da'da ah. Waa arrin aad u cakiran. Sida ugu wanaagsan waa in aad codsato oo u deyso in ay shaqaalaha go'aan ka gaaraan.

## Sidee ayaan u codsadaa SNAP?

- Tag xafiisyada adeegyada dadaweynaha ee degmada aad degan tahay oo ka soo qaado foomka codsiga. Buuxi oo soo celi.

- Haddii aadan tagi karin shaqsi ahaan, qof ayaad qoraal ku wakiilan kartaa inuu kuu soo qaado. Warqadda ayey xafiiska geynayaan oo foomka kuu soo qaadi karaan kaana caawin karaan in aad codsato.

- Waxa aad ka dalban kartaa khadka (online) ee ah https://mnbenefits.mn.gov. *(waa ingiriis)*

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha, lacagta cuntada waxaa laguugu shubayaa kaar oo sida lacag caddaan ah u isticmaali karto. Kaarka ayaad cunto kaga iibsan kartaa dukaan kasta oo ogol kaarka.

## Ma heli karaa caawinaad?

Macluumaadka SNAP waxa aad ka heli kartaa, ka ogaan kartaa in aad shuruudaha ka soo baxday, oo codsiga lagaa caawin karaa adiga oo soo waca:

Khadka Caawinaadda Gargaarka Cuntada (The MN FoodHelp line) ee 1 (888) 711-1151
Khadka Dadka Da'da Ah (The Senior LinkAge Line) ee 1 (800) 333-2433

Ama soo wac adeegga gargaarka cuntada ee gobolka

(651) 431-4050 magaalooyinka
1 (800) 657-3698 gobolka oo dhan
1 (800) 627-3529 haddii uu maqalku kugu adag yahay


Waxa aad ka ogaan kartaa halka lagaa caawin karo: www.MinnesotaHelp.info

→ Bogga u horeeya ka dooro dadka da'da ah *"Seniors"*
→ Guji "Food Assistance and Other Nutrition" (*Gargaarka cuntada Iyo Nafaqada Kale)*

Boggan waxa aad ka heli kartaa liiska gargaarka cuntada ee degdegga ah ee gobolka oo dhan.

## Maxaan yeelayaa haddii xafiiska adeegga dadweynaha uu ii sheego in aanan ka soo bixin shuruudaha gargaarka cuntada?

Haddii ay degmadu diido codsigaaga SNAP, waxa aad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato. Warqadda diidmada ee aad ka hesho waxaa la socda xaqa aad u leedahay in aad racfaan ka qaadan karto iyo taariikhda uu ku eg yahay. Xafiiska Gargaarka Sharciga ayaa laga yaabaa in uu kaa caawin karo racfaanka. La xiriir sida ugu dhaqsaha badan ee 1-(877) 696-6529.



## Ma waxaa la iga doonayaa in aan shaqeeyo si aan u helo gargaarka cuntada?

Maya. Haddii ay da'daadu tahay ama ka weyn tahay 51 jir, lagaama doonayo in aad shaqeyso si laguu siiyo gargaarka cuntada.

## Sidee ayaa inta badan dib loogu eegaa gargaarka cuntada ee la i siiyo?

Haddii xubnaha qoyskaaga ay yihiin dad waaweyn ama naafo ah waxaa dib u eegis lagu sameeyaa gargaarka cuntada ee aad qaadato 2dii sanaba hal mar Haddii kale hal mar 3dii biloodba.

## Mala i siinayaa gargaarka cuntada haddii aan la noolahay dadka aan xaq u laheyn?

Haddii ay da’daadu ka weyn tahay 60 jir oo dadka kale ee aad la nooshahay si gaar ah ayaad xaq ugu yeelaneysaa SNAP xitaa haddii aadan gooni u iibsan karin ama u karsan karin cuntadaada.



## Xaq ma u yeelanayaa SNAP haddii aan deganahay guryaha dadka lagu hayo?

Haddii aad degan tahay guryaha dadka lagu hayo, dhismayaasha dadka waayeelka u gaarka ah, ama hay’adaha kale ee bixiya cuntada karsan waxaa suurogal in aad weli ka soo bixi karo shuruudaha dadka la siiyo SNAP. Waa in aad codsataa.

## Waxa la igu leeyahay biilal dhakhatarka iyo daawada dhakhtarku ii qoro. Taas mala ii xisaabayaa marka go’aan laga gaarayo gargaarka cuntada ee la i siinayo?

Haddi ay da’daadu ka weyn tahay 60 sano waxa aad ka jiri kartaa lacagta aan laguu celin ee aad jeebkaaga ka bixiso ee caafimaadka iyo dhakhtarka ilmaha ee ka badan $35 bishii. Waxa laga jarayaa lacagta ka badan $35. Keen biilashaha caafimaadkaiyo daawada dhakhtarku kuu qoro xafiiska degaanka ee adeegga dadweynaha iyaga ayaa kuu xisaabaya.

**Fiiro gaar ah:** Taas ma xisaabi kartid haddii ceymiska caafimaadka ama qof kale oo qoyska ka tirsan uu bixiyo kharashka.


## Waxa aan shaqeeyaa saacado yar oo bulshada aan u adeego. Dakhliga i soo gala ma lagu xisaabayaa xadka dakhliga u go’an?



Haddii uu dakhliga kaa soo galo barnaamij hoos yimaada Barnaamijka Shaqaaleynta Adeegga Bulshada (Cinwaanka V ee sharciga dadka da'da ah ee Mareykanka) lama xisaabayo. Barnaamijyadan waxaa ka mid ah Shaqaaleynta Wayo Aragnida ku dhisan (Experience Works) iyo Barnaamijka Gargaarka Dadka Da’da ah.

## Lacag ayaan ku qaataa mutadawacnimada. Taas ma dakhli ayaa la ii xisaabayaa?

Lacagta yar ee laga qaato barnaamijyada mutadawacnimada sida Wehelka Dadka Da'da Ah wehel loo noqdo ama Heynta Dadka Da'da ah looma xisaabo dakhli ahaan marka la eegayo gargaarka cuntada ee lagu siinayo. Haddii aad mutadawacnimo ku shaqeyso oo xaagaa lacag ah lagu siiyo, waa inaad weydiisaa xafiiska degaanka ee Hay'adaha Adeegga dadaweynaha marka aad codsaneyso Gargaarka Cuntada. Haddii aad horey u qaadan jirtey oo aad dooneyso in aad bilowdo mutadawacnimo, la hadal shaqaalaha kula shaqeeya.



Weydiis Xafiiska Adeegga Dadwenaha dakhliga kale ee da'da ah soo gala ee la xisaabayo.

## Jeeg ayaa bil kasta iga soo gala xisaabta hawlgabka. Taas miyaa la iigu xisaabayaa xadka u go'an dakhliga iyo hantida?

Haa. Dakhliga bil kasta kaa soo gala xisaabta hawlgabka waxaa lagu xisaabayaa xadka kuu go'an ee dakhliga. Inta ku jirta xisaabta inta badan laguma xisaabo xadka u go'an hantida. Hase yeeshee, lacagta caddaanka ah ee kaaga soo harta jeegga waxaa lagu xisaabinayaa xadka hantida u go'an.

## Waxa aan ahay qof da'weyn, laakiin aan heysan dhalashada (baasaboorka). Ma jiraan barnaamijyo aan ka heli karo gargaarka cuntada?

Barnaamij gaar ah oo gobolku leeyahay, Barnaaijka Gargaarka Cuntada ee Minnesota (MFAP) ayaa caawiya dadka da'doodu tahay ama ka weyn tahay 50 jir ee aan haysan dhalashada. Ka codso MFAP xafiiska Adeegga Dadweynaha ee degaanka. Waxaa lagu siinayaa mid u dhiganta gargaarka cuntada ee lagu siin lahaa haddii aad ka soo bixi lahyed shuruudaha ku xiran barnaamijka SNAP.

### Ogaysiis ku Saabsan Muhaajiriinta!

Dad badan ayaa maqlay in Ku Tiirsanaanta Cayrtu macnaheedu yahay in qaadashada gargaar cunto uu wax u dhimi karo helida sharciga dagaanshaha ah. Xeerka **cusub ee ku Tiirsanaanta Cayrtu waxa uu ka dhigayaa mid amaan ah** in la dalbado dhamaan manfacyada oo dhan waana aad heli kartaa mucaawino gargaar cunto ah haddii aad u baahan tahay.

Eeg Warqadayada Xogta Aruursan *Fahmida Ku Tiirsanaanta Cayrta*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**